

JAMHURIYADDA		SOMALILAND
FAAFINTA RASMIIGA AH		
SOMALILAND REPUBLIC OFFICIAL GAZETTE	النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند	
XAFIISKA GARYAQQAANKA GUUD EE QARANKA JSL, HARGEYSA		
<i>E-mail:</i> Garyqaankaquud@gmail.com		
Sanadka: 4aad	Cadadka: 5aad ee May	Taariikh: 06/06/2015
QIIMAH CADADKA: SL. Sh.		
RUKUNKA (Subscription):		
QIIMAH FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad: Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.		

TUSMADA CADADKA

<u>QAYBTA KOWAAD: XEERARKA</u>	
BAARLAMAANKA IYO XEER	
NIDAAMIYAYAASHA:	
1) Go'aan Gole ee Muddo Kordhinta Xilka Madaxweynaha, Kuxigeenka Madaxweynaha iyo Goleyaasha Baarlamaanka (Wakiilada iyo Guurtida)	251
<u>QAYBTA LABAAD: XEER</u>	
NIDAAMIYAYAASHA IYO	
DIKREETOYINKA	
MADAXWEYNAHA:	
2) <u>XEER MADAXWEYNE Lr:</u>	259



0491/042015

Magacaabid,

3) **XEER MADAXWEYNE Lr:**

0496/052015

Magacaabid,

4) **XEER MADAXWEYNE Lr:**

0497/052015

Dhaqan-galka Xeer Hoosaadka
Golaha Wasiirada JSL,

260

261

QAYBTA SADEXAAD: DIGREETOOYINKA,

WAREEGTOOYINKA, AMARADA &

XEERNIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA, IWM

5) **Wareegto Wasiir, Wasaaradda Ganacsiga iyo Maalgashiga, Hirgalinta Qaadashada Lacagta Shillinka SL**

271

QAYBTA AFRAAD: AMARADA &

GO'AANADA MAAMUL

6) Diiwaan Gelin Shirikada Wasco General Trading & Auto Spare Parts Company
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud

273

7) Diiwaan Gelin Shirikada Somaliland Technology Solution,
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud

274

8) Diiwaan Gelin Shirikada Nimex Marketing Holding,
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud


276

9) Diiwaan Gelin Shirikada Nimoil Somaliland Company,
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud

277

10) Diiwaan Gelin Shirikada Henship Clearance and Forwarding Company,
Xafiiska Xeer Illaalinta Guud

279



11) Diiwaan Gelin Shirikada Horyaal- Homes Construction and Contracting Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	280
12) Diiwaan Gelin TVga, TV-ga Star Tv, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	
13) Diiwaan Gelin Shirikada Nidaam Construction Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	282
14) Diiwaan Gelin Shirikada Deegaan Modern Engineering Service, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	283
15) Diiwaan Gelin Shirikada Asaas Civil & Structural Engineering Construction & Consultancy, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	285
16) Diiwaan Gelin Shirikada Tayo-maal workshop Company, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	288
17) Diiwaan Gelin Shirikada Midnimo General Contruction Investment LTD, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	289
18) Diiwaan Gelin Shirikada Global Business Solution, <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	
19) Diiwaan Gelin Shirikada Sooyaal Construction and Contractor Company <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	291
20) Diiwaan Gelin Wargeyska Daallo Media Group <u>Xafiiska Xeer Illaalinta Guud</u>	292
21) Amar Xayiraad Guri, <u>Maxkamadda Sare JSL</u>	294
22) Amar Xayiraad Guri <u>Maxkamadda Sare JSL</u>	295
<u>QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA</u>	297
<i>Sooma bixin</i>	

QAYBTA KOWAAD:

XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER

NIDAAMIYAYAASHA:



JAMHUURIYADDA SOMALILAND
GOLAH GUURTIDDA

Tell: 00 252 2 4426342
Tell: 00 252 2 4424926



REPUBLIC OF SOMALILAND
HOUSE OF ELDERS

Website: www.guurti.com
Email: contact@guurti.com

*Address: Main Street, Shu'ab Aan, Near Presidential Palace, Gaurti House
Hargeisa, Somaliland*

REF/G/G/JSL/Go'aan Lambar 04/05/2015 Date:-11/05/2015

**Ujeedo: Go'aan Gole ee Muddo kordhinta Xilka
Madaxwaynaha, Ku- xigeenka
Madaxweynaha iyo Goleyaasha
Baarlamaanka (Wakiilada iyo Guurtida).**

Golaha Guurtidda JSL, ayaa isagoo tixraacayay warqadda Madaxwaynaha JSL ee Lr JSL/M/GG/81/2-3218/04/2015 ee 25/04/2015, kuna saabsanayd nuxur ahaan ka waajibaad qaadashada dib-u-dhaca ku yimid Doorashadii Madaxtooyada iyo Golaha Wakiiladda, kuna lifaaqnayd warqaddii Komishanka Doorashooyinka Qaranka, ayaa guutto-galay Muddo korodhsiimada.

Si Goluhu uga guto xilka kaga aadan, ayuu shir-gudoonka Golaha Guurtiddu u magaacaabay guddi ka koobnayd 30 xubnood, oo kala ahaa 28 Mudane, Xog hayaha Guud ee Golaha iyo La-Taliyaha Sharciga 30 /04/2015, Goluhuna ansixiyey kuna ansixiyay, cod loo dhamaa (unanimous).

Guddiggu fadhigoodii ugu horeeyay oo qabsoomay 3/05/2015 waxay ku dajisteen Qorshe hawleedkoodii ay ku shaqayn lahaayeen, iyado qoraalo kala gaar-gaar ah loo kala gudbiyay saddexda Xisbi Qaran iyo Komishanka

Doorashooyinka, si loo dhegaysto aragtiyahooda kala duwan ee ay ka qabaan dib-u-dhaca Doorashooyinka ku yimid iyo wakhtiga ku haboon ee ay u qabsoomi karaan si sharciga waafaqsan.

Kullankii ugu horeeyay wuxuu Guddigu ku dhagaystay si kala gaar-gaar ah labada Xisbi ee kala ah UCID iyo WADANI 05/05/2015.

Sidoo kale waxay Guddigu kullankooddii labaad-(2aad) la kala yeeshen Xisbiga Kulmiye iyo Komishanka Doorashooyinka Qaranka (KDQ) 06/05/2015.

Kullamaddaasi waxa lagu dhegaysanayay araa'da ay qabaan iyo wixii tallooyin ah ee ay soo jeedinayeen. Dhinaca kale xubnaha Guddigu waxay caddaymo iyo su'aalaba ku waydiyeen Guddigga Doorashooyinka Qaranka. Caddaymahaasi iyo suua'aalahaasiba waxay ahaayeen qaar dhinacyo badan oo kala duwan taabanaayay.

Ugu dambayntii Guddigu waxay tallo soo-jeedin danbe kaga dhagaysteen Xisbiyada Qaranka 9/5/2015, taasi oo ay ku kordhinayeen tallo soo-jeedimahoogii hore.

Guddiggu dood iyo falanqayn kadib, waxay qiimayn mugle oo ballaadhan ku sammeeyeen xaalaadka Guud iyo xaqiyooyinka dhabta ah ee kajira dalka.

Dhinaca kale waxay Guddiggu diirada ku saareen, lagama maarmaana u arkeen in Diiwaan-galinta muwaadinka Cod-bixiyayaasha iyo Doorashooyinkuba si xor ah, xalaal ah, oo Nabad-galyo ku dheehan-tahay uga wada qabsoomaan dhammaanba dalka, Gaar ahaana Gobollada iyo Degmooyinka Bariga, iyado la ilaalinayo midnimadda, iyo isu-dhammaanshaha dhul ahaaneed ee JSL.

Guddigu waxay yaqiinsadeen inay jiraan fara-galino dibadeed oo lagu kala qaybinayo, dad ahaan iyo dhul ahaanba JSL, taasina ay ka soo hor-jeedo jiritaanka iyo midnimadda umadda Somaliland, sida ku dad qodobka 38aad, farqadiisa 4aad, xarafkiisa (b) ee Dastuurka JSL.

Guddiggu waxay is-tuseen baahida loo qabo xoojinta amniga Goballadda iyo Dagmooyinka Bariga iyo isla-mar ahaantaana xal u helidda wixi tabashooyin iyo khilaafaad jira, taasi oo u baahan wakhti lagaga bogan karo suullinta arrimahaas, iyadoo la-isla kaashanayo Dawlad iyo shachiba. Wuxuu kala oo Guddiggu dood iyo falan-qayn dheer ka dib, garwaaqsadeen inay jiran qabyooyin dhinaca shuruucda ah, oon la'aantood lamudayn Karin, lana qaban karin doorashada.


Guddiggu waxay intaasi kudareen xaalada cimmilladda ee dhinaca xeebaha iyo wakhtiga ku habboon inay doorashooyinku ka qabsoomaan.

HADDABA GOLAHA GUURTIDU:-

Markii: uu dhagaystay war -bixintii Guddigga oo ay ku ladhnaayeen figradiihii, aaraa'dii iyo tallooyinkii saddexda xisbi qaran iyo Komishanka Doorashooyinka;

Markii: uu qiimeeyey xaaladka, iyo duruufaha ka jira gobolladda iyo Degmooyinka Bariga iyo guud ahaanba dalka JSL;

Markii: lagama-maarmaan u arkay inay ka suurto-galaan Diiwaan-galinta Muwaadinka iyo cod-bixiyayaashu dhamaanba dalka JSL, si ay usuganto is-raacsanaanta dhul ahaaneed iyo dad ahaaneedba ee Dastuurku waajibiyeyey;



- Markii:** uu yaqiinsaday in go;aankii ay ku cayimeen komishanku wakhtiga doorashadu uu ahaa mid baal marsan, waafaqsanayn Dastuurka iyo shuruucda dalka iyago sammeeyay muddo korodhsiimo anay awood sharciyeed ulahayn;
- Markii:** ay arkeen in xeerkii hore ee doorashada ee Golaha Wakiiladu u ku dhaqankiisu ku ekaa doorashadii hore oo kaliya, illaa haddana aanu jirin xeer u diyar ah doorashada Golaha Wakiiladda, kaasi oo u baahan wakhti, wada-hadal, is-qancin, iyo isu-tanaasul dhinaca saami-qaybsiga oo hore moran uga taagnaa, illaa haddana uu ka taaganyahay;
- Markii:** uu qiimeeyeyey xaalaadka cimilladda ee Degmooyinka xeebaha dalka JSL iyo wakhtiga ku haboon inay doorashadu ka qabsoonto;
- Markii:** uu si mugleh u qiimeeyay xaalaadka dhaqan/dhaqaale bulsho, iyo nabad galyaba, guud ahaanba, gaar ahaana saamaynta dhaqaale ee colaadda ka oogan gacanka cadmeed ay ku yeellatay ganacsigii somaaliland;
- Iyado** laga taxadirayo, dib-u dhac danbe oo kuyimaada doorashooyinka iyo mudo kordhin soo noq-noqota iyo dhammays tir la'aan qabyooyinka taagan;
- Marku** arkay qodobka 42aad farqadiisa saddexaad ee Dastuurka JSL;



- Marku** arkay qodobka 83aad farqadiisa 3aad iyo 5aad e Dastuurka dalka JSL;
- Isago** ka duullaya, tix galleyeyna, kuna go'aan qaataay dhamaanba sababaha kor ku sheegan, kuna cad;

WUXUU SOO SAARAY GO'AAMADDANI:

B. Muddo korodhsimooyin.


1. Wuxuu la-laalay muddada doorasho ee ku cayiman warqadda lambar KDQ/XK/406/2015 ee 20/04/2015, kana soo baxday xafiiska koomishanka Doorashooyinka Qaranka, madama anay waafaqsanayn xeerka doorashada lambar 20/2001, qodobkiisa 8aad oo u dhigan nuxur ahaan “in anay komishanku cayimi karin muddo-maalindoorasho oo ka baxsan dhamaadka muddo xileedka Madaxwaynaha, ku-xigeenka iyo Golaha Wakiiladaba. “sido kalana anay waafaqsanayn qodobada 42aad iyo 83aad ee Dastuurka JSL.
2. Wuxuu muddo xileedkii Madaxwaynaha iyo ku xigeenka Madaxwaynaha oo ku eg 27/7/2015, lagu sammeeyay korodhsimo ka bilaabmaysa 28/7/2015 illa 27/4/2017.
3. Golaha Wakiiladda oo dhammaadka muddo xileedkoodu ku egyahay 27/7/2015, lagu sammeeyay muddo korodhsimo ka bilaabmaysa 28/7/2015 illa 27/4/2017.
4. Muddo xileedka Golaha Guurtiddu wuxuu noqonayaa hal sano kadib (one year after) dhammaadka muddo xileedka Golaha wakiiladda oo noqonaya 27/4/2017, sida waafaqsan ama ku cad go'aanka lambar GW/KF-19/245/2003 ee 29/03/2003, una dhigan “in muddada xilka Golaha

Guurtidu markastaba hal sano ka danbayso taariikhda dhammaadka muddada xilka Golaha wakiiladda” sidaasi daraadeedna, muddo xileedka Golaha Guurtiddu waxay ku eegtahay 27/04/2018.

5. Doorashada Madaxtooyadda iyo Golaha Wakiiladdu waxay qabsoomayaan isla hal wakhti, ahrii bil ka hor dhammaadka muddo xileedka loo kordhiyay, oo waafaqsan qoddobadda 42aad iyo 83aad ee Dastuurka Dalka Jamuuriyada Somaliland.

T- Wajibaadka la kala qabanayo, la wada qabanayo iyo hawlaха la dhamaystirayo

1. Iyadoo xukuumaddu horumuud ka ah, waa in si deg-deg ah qorshe dhammaystiran oo iskaabaya (comprehensive and special programme) oo qaran lagu wajaha Gobollada iyo Dagmooyinka Barriga, oo laga taabo-galiyaa maamul adag iyo amni, si looga suurto-galiyo diwaangalin muwaadin, cod-bixiye iyo doorashaba.
Sidoo kalena loo sammeeyaa Barnaamij hawleed ugaar ah, oo laga wada qayb-galayo Goleyaal ahaan, Xisbiyo Qaran, komishan doorasho, waxgaradka bulshada qaybaaoga kala duwan iyo shachiba.
2. Qabyooyinka dhinaca xeerarka Golayaasha (Wakiiladda iyo Guurtiddaba) iyado xukuumaddu ku hoggaaminaysa waa in si wada jir ah oo xil-kasnimo ku jirto loo dhammaystiraa, qorshe deg-deg ahna laga yeesha. Waajibaad gudasho la’aan ayay noqonaysaa haddii aan loo qalab qaadanin dhammaystirka qabyooyinka dhinaca shuruucda.
3. Golaha Guurtidda waxa ku waajib ah isagoo gacan-siinaya xukuumadda inuu ka qayb qaato iskuna diyaariyo adkaynta nabadgalyada iyo wacyi-galinta bulshadda qaybaheeedda kala duwan.

- 
4. Golaha wakiiladda waxa ku waajib ah in uu meel-mariyo qaybna ka qaato hindise sharciyeedyada qaranku u bahan yahay si firfircoo, oo xilkasnimoo ku jirtana u gutaan waajibaadkooda Dastuuriga ah.
 5. Komishanka Doorashooyinka Qaranka waxa waajib ku ah in ay ku tallo-galaan siddi Degmo **kasta** iyo Gobolkasta looga hirgalin lahaa diwaan-galin muwaaadin, cod bixin iyo doorashaba.
 6. Komishanka Doorashooyinka qaranku, waa in ay ku tallaabsadaan barnaamij wax ku ool ah oo horseedaya doorashooyin xor iyo xalaal ah, qof kastaana ku dhiiban karo hal cod oo keliya, isla-marahaantaana siiyaan muwaadiniinta isdiwaangelinaysa wakhti ku filan.
 7. Komishanka waxa waajib ku ah ku dhaqanka shuruucda iyo Dastuurka dalka JSL.
 8. Xisbiyada Qaranka waxa waajib ku ah in ay la yimadan Barnaamijyo siyaasadeed oo bulshadda ka gudbinaya caqabadaha kala duwan ee haysta ee ragaadiiyay hour-markooda, kana waantooabaan wixii bulshadda iska horkeenaya ee dibu-dhaca ku keenaya.

Ugu dambayntii Goluhu wuxuu baaq u soo jeedinaya ummadda reer Somaliland Guddo & Dibaddba, waxayna ka codsanayaan kuna adkaynayaan in taabo-galinta iyo meel-marinta Himmilooyinka Qaranka meel looga soo wada jeesto yar iyo waynba.


Dhinaca kalana Beesha Caalamka, waxaan u shegayna in Qarankani iyo umaddiisuba ubaahantahay taageeradooda, balse teegaradoodu anay noqon mid ka soo horjeeda maslaxada, danta, rabintaanka, doonista shacbiga iyo jiritaanka madax-banaanidda JSL.

Go'aamadani waxa lagu ansixiyay oo ogoladay 72 iyado tirada kooramku ahayd 77 waxa diiday 4Mudane waxa ka aamusay 0, Gudoomiyuhuna ma uu codayn.


NB waxaa ku lifaaqan halkani liistadii Gudigga & xubnihii madasha fadhiba ka qayb-galay.

Alla Mahad Leh


Suleymaan Maxamuud Aadan
Guddoomiyaha Golaha Guurtidda JSL




Sicid Jaamac Calli
Gudd-ku-xigeenka 1aad ee Golaha Guurtidda



C/raxmaan Sh. Yuusuf Sh. Madar
Gudd-ku-xigeenka 2aad ee Golaha Guurtidda JSL



C/laahi Ibraahim Habane
Xoghayaha Guud ee Golaha Guurtidda JSL



QAYBTA LABAAD:
XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO
DIKREETOYINKA MADAXWEYNHA:



REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3252/042015

DATE....30/04/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0491/042015

Magacaabid

**Mareeyaha Guud ee Telefishanka Qaranka ee
Madaxa Bannaan ee JSL**

(Managing Director of the Autonomous National
TV of Somaliland)

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland


Markuu Arkay: Qodobka 90aad Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Baahida loo qabo in la
magacaabo Maareeyaha Guud ee
Telefishanka Qaranka Madaxa
Bannaan ee Jamhuuriyadda
Somaliland;

Markuu Tixgeliyay: Soo jeedimihii iyo talooyinkii mas'uuliyinta kala duwan;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo ~~xilkan~~ loo magacaabay;



Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Cabdi Cali Mahdi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Guud ee Telefishanka Qaranka Madaxa Bannaan ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND



THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3320/032015


DATE....24/05/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0496/052015

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 3aad,
Xarafka (r) ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey:	Ahmiyadda Somaliland u fadhiya dalalka dibaddu u leeyihun dhismaha Qaranka;	Wakiiladda Somaliland u fadhiya Dalka Itoobya;
Markuu Arkay:	In baahi loo qabo buuxinta jagada Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya Dalka Itoobya;	
Markuu Ka Fiirsaday:	Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;	
Markuu Ku Qancay:	In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;	

Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Maxamuud Aaden Jaamac Galaal, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wakiilka Jamhuuriyadda Somaliland u fadhiya Dalka Itoobya.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3322/052015

DATE....25/05/15

XEER MADAXWEYNE Lr: 0497/052015

Dhaqan-galka Xeer Hoosaadka

Golaha Wasiirada JSL

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



- Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Qodobka 75aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Arkay: Go'aanka Golaha Wasiirada JSL, Go'aan Lr. 164 ee ku taariikhaysan 30/04/2015, ee ay ku ansixiyeen Xeer Hoosaadka Golaha Wasiirada Jamhuuriyadda Somaliland;

Wuxuu Soo Saaray

Dhaqan-galka Xeer Hoosaadka Golaha Wasiirada Jamhuuriyadda Somaliland ee lagu ansixiyey Shirka Golaha Wasiirada ee tirsigiisu yahay 164.

Allaa Mahad Leh,

Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

XEER-HOOSAADKA GOLAHA WASIIRRADA 04/2015

Qodobka 1aad **GOLAHA WASIIRRADA**

Golaha Wasiirradu oo ah Gole Dastuuri ah, oo Madaxweynaha ka kaaliya fulinta xilkiisa. Golaha Wasiirradu waa Gole Dimuqraadi ah oo ku dhisan wadatashi, go'aanadiisu waa kuwa ka turjumaya Siyaasadda

Guud (Dibed iyo Gudo), Qorshoyaasha iyo Barnaamijada Xukuumadda.




Qodobka 2aad
QAAB DHISMEEDKA GOLAJA WASIIRRADA

- A. Golaha Wasiirradu wuxuu ka koobanyay:
 1. Madaxweynaha JSL.
 2. Madaxweyne Ku-xigeenka JSL
 3. Xubnaha Golaha Wasiirada (Wasiiradda, Wasiiru-dawlayaasha iyo Wasiir Ku-xigennada).
- B. Golaha Wasiirradu wuxuu leeyahay dhismaha hoos ku cad:
 1. Guddoomiyaha Golaha oo ah Madaxweynaha ama Madaxweyne Ku-xigeenka marka uu Madaxweynuhu maqanyahay.
 2. Guddiyada Golaha Wasiirada.
 3. Xoghaynta Golaha Wasiirada.

Qodobka 3aad
AWOODAJA GUDDOOMIYAH

Awoodaha Guddoomiyaha Golaha Wasiirradu waa:

1. Qabashada iyo guddoominta Fadhiyada caadiga ah iyo kuwa aan caadiga ahayn ee Golaha Wasiirada.
2. Hagidda Fadhiyada Golaha.
3. Diyaarinta Ajandaha Fadhiyada Golaha.
4. Ogolaanshaha soo jeedimaha Xubnaha Golaha Wasiirada.
5. Ogolaanshaha inay ka soo qeyb-galaan Fadhiyada Golaha Wasiirada Xubno aan ka tirsanayn Golaha, ka dib markay sidaas qoraal sababaysan ku soo codsadaan Xubin/Xubno Golaha ka tirsani, balse xubnahaas la casuumay ma laha cod.

- 
6. Go'aaminta baahinta war-murtiyeedyada iyo war-saxaafadeedyada (Communiques and Press Release) ka dhasha Fadhiyada Golaha Wasiirada.
 7. Ku dhawaaqidda Go'aanada Golahu gaadho gebagebada Fadhiyada.
 8. Furista, Xidhistaa iyo Qeybinta Doodaha ee Fadhiyada.
 9. Haddii Guddoomiyuu sababo jira dartood u guddoomin Karin shirkha wuxuu u igman kara Xubin ka mid ah Golaha Wasiirada.

Qodobka 4aad

GUDDIYADA GOLAHA WASIIRRADA

1. Guddoomiyaha Goluhu waxa uu magacaabi karaa Guddiyada Golaha dhexdiisa ah si ay u soo darsaan ama u xalliyaa arrin gaar ah.
2. Guddiyada Golaha Wasiirradu waxay noqon karaan Guddi Joogto ah iyo Guddi ku meel gaadh ah.
3. Guddiyada Joogtada ah ee Golaha Wasiirradu waa:
 - i. Guddida Nabadjelyada iyo Cadaaladda
 - ii. Guddida Dhaqaalaha.
 - iii. Guddida Arrimaha Bulshada.
 - iv. Guddida Shuruucda iyo Siyaasadda.
 - v. Guddida Arrimaha Dibedda iyo Ictiraaf Raadinta.
4. Wawa Xubnaha iyo hab-raaca faahfaahinaya hawlaha Guddiyada lagu qeexaya Wareegto Madaxweyne.
5. Xeerarka iyo Siyaasadaha loo qorsheeyey in Goluhu go'aan ka qaato, waxay ku horreynayaan Xafiiska Golaha Wasiirada iyo Gudoomiyaha Golaha, Xafiiskuna waxa uu u gudbinaya hadba Guddida ay arrintaasi khusayso si ay Guddidu u soo dhigaan Golaha marka ay waajibaadkooda ka gutaan.

Qodobka 5aad

XOGHAYNTA GOLAHA WASIIRRADA

- A. Xoghayanta Golaha Wasiirrada waxay ka koobantahay Xoghayanta Golaha, La-taliyayaasha kala duwan, khubaro wixi loo baahdo iyo shaqaale.
- B. Xoghaynta Golaha Wasiirrada waxay u xil saarantahay:
1. Qaban -qaabada iyo agaasinka hawsha Fadhiyada Golaha.
 2. Qabashada soo jeedimaha (Agenda) ka yimaadda Xubnaha Golaha Wasiirrada iyo u gudbinta Guddoomiyaha Golaha si uu ugu go'an gaadho.
 3. Diyaarinta Ajandaha Fadhiyada si waafaqsan sida Guddoomiyuhu tilmaanta ku bixiyo.
 4. Qorista Doodaha iyo Go'aammada Fadhiyada.
 5. Daabacaadda iyo Xafidaada hadal-qoraaladda iyo Go'aammada Fadhiyada.
 6. Gaadhsiinta go'aammada Goluhu gaadho Hay'adaha ay khuseeyaan.
 7. Diyaarinta war-murtiyeedyada iyo warsaxaafadeedyada (Communiques and press Release) sida uu Guddoomiyaha Goluhu kuwa ku bixiyo.
 8. Diiwaan-gelinta Go'aammada, iyada oo tix-gelinta la siinayo sida ay u kala muhiimsan yihiin iyo la socoshada kuwa la fuliyey.
 9. Diiwan-gelinta Xubnaha Golaha ee ka soo xaadiray Fadhiyada iyo kuwa maqan (Diiwaanka rasmiga ah).
 10. Gaadhsiinta Xubnaha Golaha Wasiirrada Ajandaha 24 sacadood gudahood Fadhiga ka hor.
 11. Ogeysiinta iyo isugu yeedhida Shirka Golaha iyo ku wargalinta Xubnaha Golaha Taariikhda, Goobta iyo Ajandaha.

Qodobka 6aad

QAB-SOOMIDDA FADHIYADA


1. Fadhiyada Golaha Wasiirradu waxay ku qabsoomayaan aqlibiyada hal dheeri ah (kala badh iyo kow) ee Xubnaha Golaha.
2. Go'aammada Golaha Wasiirradu waxay ku ansaxayaan cod hal dheeri ah.
3. Faadhiyada Caadiga ah ee Golaha Wasiirradu waxay noqonaysa toddobaadkii hal maalin, waxaana astaynaya Madaxweyanaha JSL,
4. Xilliga Fadhiyada aan Caadiga ahayn waxa go'aaminaya Guddoomiyaha, waxaana si deg deg ah loogu war-gelinaya Xubnaha Golaha Wasiirrada.
5. Fadhiyada Golaha Wasiirradu waxa ay ku qabsoomayaan Qolka Shirarka ee Golaha Wasiirrada ama halkii kale ee hadba Gudoomiyuhu go'aamiyo.

Qodobka 7aad AJANDAHA FADHIYADA

1. Guddoomiyaha Golaha ayaa soo diyaarinaya Ajandaha Fadhiyada Golaha.
2. Xubnaha Golaha Wasiirradu qodobada ay doonayaan in lagu daro Ajandaha qoraal af soomaali ah ayay ugu soo gudbinayaan Xoghaynta Golaha ugu yaraan 48 Saacadood ka hor maalinta Fadhiga, waxaana loo gudbinaya Guddoomiyaha si uu go'aan ugu gaadho.

Qodobka 8aad HAB-MAAMULKA FADHIYADA GOLAHA


1. Dhammaan Xubnaha ku sugaran Madasha Fadhigu waa in ay saxeexaan diiwaanka rasmiga ah ee Golaha (Attendance Register).

- 
2. Waxa Shirka Golaha Wasiirrada furaya Guddoomiyaha Golaha, waxaana waajib ah in Fadhi kasta lagu furo Aayadaha Quraanka kariimka ah iyo Duco ka dambeysa, waxaana akhriyaya Wasiirka Diinta iyo Awqaafta, hadduuse maqan yahay, Guddoomiyaha ayaa xubin kale ka codsanaya.
 3. Waqtiyada Salaadaha waa la hakin karaa doodaha fadhiga, iyada oo salaadda ka dib halkii laga sii wadi doono.
 4. Guddoomiyaha ama cidda uu u igmaado ayaa wargelinaysa Golaha goaamadii shirkii kan ka horreeyay.
 5. Qodob kasta oo ka mid ah Ajandaha waxa dooddiisa la soo xidhayaa inta aan loo gudbin doodad qodobka xiga, sidaasaana lagu dhammanayaa dhammaan qdobada Ajandaha.
 6. Marka shirku xidhmo, wasiirradu way fadhiyayaan inta Madaxweynaha iyo Madaxweye ku -xigeenku ka baxayaan.
 7. Go'aammada Shirarka Golaha Wasiiradda wixii ka fulay iyo wixii aan ka fulinba waxaa dib loo eego lixdii biloodba mar.

Qodobka 9aad **QEYBINTA DOODAHA**

1. Guddomiyaha Golaha ayaa qaybinaya hadalka, xubinta loo oggolaaday hadalka waa in uu codkiisa gaadhsiiyaa Golaha.
2. Waxa reebban in ay hadalka qaadato Xubin aan loo oggolaanini.
3. Qodob aan ku jirin Ajandaha Fadhiga lagama doodi karo.

Qodobka 10aad **WAX-KA-BEDDEL AMA BAABI'IN GO'AAN**



1. Wax-ka-beddelka ama baabi'inta Go'aan Goluhu hore u gaadhad waxa soo jeedin Kara Guddoomiyaha ama Xubin kasta oo kamid ah Golaha.
2. Wax-ka-beddelka ama baabi'inta Go'aan Goluhu gaadhad wuxuu ku ansaxayaa cod hal dheeri, hadday is le'ekaadaan waxa kala saaraya Guddoomiyaha Golaha.

Qodobka 11aad
XAQA XUBNAHA EE DOODDA

1. Madaama Jamuuriyada Somaliland tahay dal Dimuqraadi ah, Xubin kasta oo Golaha ka tirsani waxay six or ah oo waafaqsan sharciga u cabiri kartaa afkaarteeda.
2. Xubnaha Golaha Wasiirradu waxay afkaartooda ku cabiri karaan Qoraal ama Afba.

Qodobka 12aad
KA QEYB GALKA FADHIYADA

1. Xubin kasta oo ka tirsan Golaha waxaa waajib ku ah in ay ka soo qayb-gasho Fadhiyada Golaha.
2. Xubinta ugu maqnaanaysa Fadhiiga sabab cudur daa leh, waxaa waajib ku ah in ay u soo gudbiyaa Xafiiska Golaha Wasiirrada intaan la gaadhin xilliga shirka.

Qodobka 13aad
DHAQAN GELINTA GO'AAMMADDA IYO XEERARKA

1. Xubin kasta oo ka tirsan Golaha Wasiirradu waa in ay fuliso, hirgaliso, kuna dhaqanto Go'aammada Golaha Wasiirrada.
2. Xubin kasta waxa waajib ku ah in ay ilaaliso kuna dhaqanto Xeer Hoosaadka Golaha.

Qodobka 14aad
ILAALINTA SIRTA QARANKA



1. Waa waajib Qaran oo saaran Xubin kasta oo Golaha ah Ilaalinta Sirta Qaranku.
2. Dood kasta oo lagu yeesho Golaha ama go, aan kasta oo lagu gaadho Golaha waa qarsoodi illaa inta laga go; aansanayo faafintiisa.
3. Muwaadin kasta oo Xil Qaran ahayn jiray waxa ku waajib ah ilaalinta Sirta Qaranka inta uu nool yahay, kamana faalloon karo marka uu shaqada ka tago isagoo u adeegsanaya dano siyaasadeed.

Qodobka 15aad
WADA-SHAQAYNTA XUBNAHA GOLAJA WASIIRRADA

1. Waxa waajib ah in Xubnaha Goluhu isku duubnaadaan dhinac walba (Siyaaasadda Qaranka iyo tan Xisbiga iyo dhinaca shaqadooda) si ay u meel marto shaqada Qaranku.
2. Maadaama Xubnaha Golaha Wasiirradu ay u xilsaaran yihiin Danta guud ee Qaranka, Xubin kasta waxa waajib ku ah inaan dhinaciisa waxa dayac ahi ka iman.

Qodobka 16aad
DHAWRISTA HAYBADDAA IYO SHARAFTA

Xubin kasta oo Golaha Wasiirrada waxa ku waajib ah in ay dhawrto karaamada iyo haybadda Xilka Qaranka ee ay hayso, isla markaana ay dhawrto sharafta xubnaha kale ee Golaha.

Qodobka 17aad
WAX-KA-BEDDELKA IYO DHAQAN-GALKA XEER
HOOSAADKA

1. Xeer Hoosaadkani waxa wax ka beddel lagu samayn karaa marka loo baahdo.
2. Xeer Hoosaadkani wuxuu dhaqan-galaya marka Goluhu ansixiyo Madaxweynuhuna saxeexo.



QAYBTA SADDEXAAD:
DIKREETOOYINKA, WAREEGTOOYINKA,
AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA
WASIIRADA, IWM:

**REPUBLIC OF SOMALILAND
MINISTRY OF TRADE AND
INVESTMENT**



**JAMHUURIYADA SOMALILAND
WASAARADA GANACSIGA &
MAALGASHIGA**

Ref: WG&M/XW/25/083 /2015

Date: 25/5/2015

Ku:- Dhammaan Ganacsatada iyo Goobaha gaarka loo leeyahay ee adeegyada Waxbarashada, Caafimaadka, Biyaha, Isgaadhsiinta, Korantada, Huteelda Cuntada, Hurdada, warshadaha iyo Cid kasta oo Samaysa Adeeg Ganacsi.

OG: - Wasiirka Wasaarada Maaliyada JSL Harg

OG: - Wasiirka Wasaarada Arimaha Gudaha JSL Harg

OG: - Wasiirka Waxbarashada iyo Taclinta Sare JSL Harg

OG: - Gudoomiyaha Baanka Dhexe JSL Harg

OG: - Gudoomiyaha Rugta Ganacsiga, warshadaha iyo Beeraha JSL Harg

OG: - Madaxweynaha JSI Mudane Axmad Maxamad
Maxamud



**Ujeedo: - Wareegtada Hirgalinta Qaadashada Lacagta
Shillinka SL**

Aniga oo Tix raacaya Shuruucda Dalka sida Dastuurka JSI , Xeerka Baanka , iyo xeerarka Ganacsiga iyo Maaliyada ee ku salaysan in sh.sl uu yahay lacagta rasmiga ah ee dalkan JSI, iyada oo la eegayo dhibaatada uu ku hayo isticmaalka tooska ah ee dollarku dhaqalaha dalka, sarifka lacagta iyo sicir bararka , iyada oo laga duulayo go'aamadii ka soo baxay kulamadii laga yeeshay arimahaas ee ay isugu yimaadeen wasaaradaha Ganacsiga , Maaliyada , arimaha gudaha, Rugta ganacsiga , Baanka dhexe JSI iyo Wakiilada shirkadaha kala duwan ee Ganacsiga iyo u adeegida Bulshada , waxaan halkan idiinku soo gudbinayaa wareegtadan.

Wasaarada Ganacsiga iyo maalgashiga caalamiga ah waxay ku wargalinaysaa dhammaan Ganacsatada iyo Goobaha gaarka loo leeyahay ee adeegyada Waxbarashada, Caafimaadka,Biyaha, Isgaadhsiinta,Korantada,Huteelda Cuntada ,Hurdada,warshadaha iyo cid kasta oo samaysa adeeg ganacsi

- In lacagta rasmiga ah ee dalka JSI uu yahay Shillinka SL.
- In cid kasta oo samaysa adeeg ganacsi ay u isticmaasho Shillinka SL lacagta ay qaadanayso iyo lacagta ay bixinayso labada.
- In cid kasta oo sidaa ugu dhaqmi wayda wareegtadan laga qaadi doono talaabo sharicga waafaqsan

Dr. Muse Qaasim Aw Cumar

Wasiirka Wasaaradda Gancsiga iyo Maalgashiga



QAYBTA AFRAAD:

AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

JAMHURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/74/2015.

04/05/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo: - Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaaanta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, WASCO GENERAL TRADING & AUTO SPARE PARTS COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugaran yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay, WASCO GENERAL TRADING & AUTO SPARE PARTS COMPANY, Astaanteeduna tahay:- (Shimbirka Gogorka oo magaca Shirkaduna ku hoos qoran yahay) shaqadeeduna tahay Ganacsi Guud (General Trading), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 04/05/2015

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Seer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SOMALILAND TECHNOLOGY SOLUTION, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay: In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugaran yihiin.


Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay shirkada magaceedu yahay, SOMALILAND TECHNOLOGY SOLUTION, Astaanteeduna tahay: - (Laba Arrow oo sii kala jeeda magaca shirkaduna ku hoos

qoran yahay) shaqadeeduna tahay Adeega IT (IT Service), xarunteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 04/05/2015

Allaa Mahad Leh.



(Xasan Axmed Aadan)

Heer Ilaaifiya Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/75/2015.

06/05/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Heer Ilaaista Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Heer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Heer Ilaaista Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, NIMEX MARKETING HOLDING, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu,

sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a)
Somaliland Company Law.

Markuu arkay: -

In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugaran yihiin.

Markuu arkay: -

Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, NIMEX MARKETING HOLDING, Astaanteeduna tahay: - (Magaca Shirkada shaqadeeduna Suqgeynta (Marketing), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taariikhdu tahay 06/05/2015.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diwaan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship).

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, NIMOIL SOMALILAND COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay: - In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .


Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, NIMOIL SOMALILAND COMPANY, Astaanteeduna tahay: - (Magaca Shirkada)

Shaqadeeduna tahay Soo Dejinta Shidaalka (Fuel Importation), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo manta oo ay taariikhdu tahay 06/05/2015.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)



Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/77/2015.

06/05/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaaonta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadha Magaceedu yahay, HENSHIP CLEARANCE AND FORWARDING COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida

ku cad Qodobka 11aad (2) (a)
Somaliland Company Law.

Markuu arkay: - In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugaran yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, HENSHIP CLEARANCE AND FORWARDING COMPANY, Astaanteduna tahay: - (Mapka Aduunka oo ay ku dhix sawiran yihiin Markab, Baabuur iyo Diyaarad) Shaqadeeduna Adeega Rarista iyo Dejinta (Clearing and Forwarding Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Berbera, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 06/05/2015.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/78/2015.

06/05/2015



Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diwaan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship).

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HORYAAL-HOMES CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay: - In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugaran yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, HORYAAL HOMES CONSTRUCTION AND CONTRACTING COMPANY, Astaanteeduna tahay: - (Guryo) Shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Boorama, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 06/05/2015.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

XIG/JSL/79/2015.

09/05/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwaan Gelin TV

Xafiiska Xeer Ilainta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Saxaafada dalka.

Markuu arkay: - Qodobadda 32aad ee Dastuurka Jamhuuriyada Somaliland.

Markuu arkay: - Qodobka 6aad iyo 7aad ee Xeerka Saxaafadda Xeer Lam.27/2004.

Markuu arkay: - Warqada Ogolaanshaha ee Wasaaradda Warfaafinta sumadeedu tahay WWW/XWK/46/2014, Kuna taariikhaysan 19/08/2014 oo ay ogolaatay Tv-ga STAR TV.

Markuu arkay: - Codsiga uu soo qortay Mulkiilaha TV-ga Star Tv, kuna codsanaayo in loo Diiwan Galiyo TV-gan, kaas oo balan qaadaya dhinaciisa in uu u hogaansami doono Xeerka Saxaafadda iyo Xeerarka kale ee Dalka JSL.

Wuxuu Ogolaaday.

Inuu si sharci ah uga diiwan gashan yahay Tv-ga Magaciisu yahay STAR TV, xaruntiisuna tahay Magaalada Hargeisa.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA



SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL



Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwaan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaainta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwaan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u Siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, NIDAAM CONSTRUCTION COMPANY, oo ay ku cad yihiin Xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company Law.

Markuu arkay: - In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugaran yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Ogolaaday.

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, NIDAAM CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay: - (Magaca Shirkada) Shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction),

xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 10/05/2015.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)



Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX:- XIG/JSL/82/2015.

10/05/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship).

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay DEEGAAN MODERN ENGINEERING SERVICE, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad

Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.



Markuu arkay:-

In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugaran yihiin.

Markuu arkay:-

Saxeexa saamilaha Shirkaddu u saxeexay, sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, DEEGAAN MODERN ENGINEERING SERVICE, Astaanteeduna tahay: - (Aqal bulug ah oo xarfo dulsaraan yahay magaca shirkada oo la soo qaabiyyey ku dhex jiro), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarnteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 10/05/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA SOMALILAND




XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/83/2015

10/05/2015



Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska XeerI laalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship).


Markuu Arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, ASAAS CIVIL & STRUCTURAL ENGINEERING CONSTRUCTION & CONSULTANCY, oo ay ku cad yihii xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu Arkay: - In ay saamiga Shirkaduu waafaqsan yihii Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugaran yihii.

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkadduu saxeexay, sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu ASAAS CIVIL & STRUCTURAL ENGINEERING CONSTRUCTION & CONSULTANCY, Astaanteeduna tahay: - (Xarfaha ACSE), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarnteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 10/05/2015

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Seer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX: - XIG/JSL/84/2015

13/05/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Seer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwan Gelinta Shirkadaha. (Sole Proprietorship).

Markuu Arkay: - Qodobadda 11aad ee Seer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay
Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay,
TAYO-MAAL WORKSHOP COMPANY,
oo ay ku cad yihiin xubnaha
Shirkaddu, sida ku cad Qodobka
11aad (2) (a) Somaliland company
Law.

Markuu Arkay: - In ay saamiga Shirkaduu waafaqsan
yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer
N0.25/2004 Company Act of
Somaliland, saamiyadooduna ay
sugan yihiin.

Markuu Arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkadduu
saxeexay, sida uu qabo qodobka
11aad xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay
Shirkada magaceedu TAYO-MAAL WORKSHOP
COMPANY, Astaanteduna tahay: - (Magaca Shirkada),
shaqadeeduna tahay Farsamada Birta, xarunteeduna
tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay
taarikhdu tahay 13/05/2015

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Seer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX:- XIG/JSL/85/2015.

13/05/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay MIDNIMO GENERAL CONTRACTOR INVESTMENT LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugaran yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilaha Shirkaddu u saxeexay, sida uu qabo qodobka

11aad xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, MIDNIMO GENERAL CONTRACTOR INVESTMENT LTD, Astaanteduna tahay:- (Magaca Shirkada), shaqadeeduna Soo Dejinta iyo Dhoofinta (Import and Export), xarnteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 13/05/2014

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX:- XIG/JSL/86/2015.


13/05/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwan Gelinta Shirkadaha.



- Markuu arkay:-** Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.
- Markuu arkay: -** Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, GLOBAL BUSINESS SOLUTION, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.
- Markuu arkay:-** In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadoo duna ay sugar yihiin.
- Markuu arkay:-** Saxeexa saamilayda Shirkaddu u saxeexeen, sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, GLOBAL BUSINESS SOLUTION, Astaanteeduna tahay:- (Magaca Shirkada), shaqadeeduna Adeega Talo bixinta xaga Maamulka iyo maaraynta Ganacsiga (Management Consultancy), xarnteeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 13/05/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX:- XIG/JSL/87/2015.

13/05/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaray Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, SOOYAAL CONSTRUCTION AND CONTRACTOR COMPANY, oo ay ku cad yihii xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland company Law.

Markuu arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihii Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihii.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu u saxeexeen, sida uu qabo qodobka 11aad xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha .

Wuxuu Diiwaan Geliyey.



Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwaan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, SOOYAAL CONSTRUCTION AND CONTRACTOR COMPANY, Astaanteeduna tahay:- (saddex Guri Qoys), shaqadeeduna Dhismaha (Construction), xarneeduna tahay Magaalada Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taarikhdu tahay 13/05/2014.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

OFFICE OF THE ATTORNEY GENERAL

TIX:- XIG/JSL/88/2015.

17/05/2015

Hargeysa.

Ku: Cida Ay Khusayso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Wargeys

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamuuriyada Somaliland oo uu xil saaran diiwan gelinta Saxaafada dalka.



- Markuu arkay:-** Qodobka 32aad ee Datuurka Jamhuuriyada Somaliland.
- Markuu arkay:-** Qodobka 6aad iyo 7aad ee Xeerka Saxaafadda Xeer Lam.27/2004.
- Markuu arkay:-** Warqada Ogolaanshaha ee Wasaaradda Warfaafinta sumadeedu tahay WWW/XW/185/052015, Kuna taariikhaysan 13/05/2015 oo ay ku ogolaatay Ruqsada Wargeyska Daallo Media Group.
- Markuu arkay:-** Codsiga ay Mulkiilayaashu u soo qorteen, kuna codsanaayo in loo Diiwan Galiyo Wargeyskan, kuwaas oo balan qaaday dhinacooga in ay u hogaansami doonaan Xeerka Saxaafadda iyo Xeerarka kale ee Dalka JSL.

Wuxuu Ogolaaday.

Inuu si sharci ah uga diiwaan gashan yahay Wargeyska Magaciisu yahay DAALLO MEDIA GROUP, xaruntiisuna tahay Magaalada Hargeisa

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

**Supreme Court**

Ku: Taliyaha SaLdhiga Maxamuud Haybe

Ku: Taliyaha saldhiga Maxamed mooge

Ku: Taliyaha Qaybta Booliska Bariga

Ku: Dhamaan Xafiisyada Nootaayooyinka Fadhiyadooda

Og: Jaraa'idka Madaxa Banaan

Og: Raadyo Hargeysa

Og: Xafiiska Garyaqanka Guud ee Qaranka JSL.

Ujeedo: Amar Xayiraad Guri Lambar.No-MHJW.J.6.12

(5030103P181)

Tixraaca Arjiga ku taariikhaysan 6/5/2015 una soo Gudbiyay Qareen S/L Cali Cabdi Guuled Kuna Saabsan Codsi xayiraad Guri NO-MHJW.J.6.12 (5030103P181). Kuna yaala degmada M/Haybe xaafada jameeco weyn ee cabirkiisuna dhan yahay 12x12 m kuna qoran tahay Dulmar Xasan yuusuf jihoo yinkiisuna yihiin, W= wado, B= Wado, K= Dhisme G=dhisme iyo sandaqada ku taala Xaafada sh shugri Degmada Maxamuud Haybe Cabirkeeduna dhan Yahay 12x12mm jihoo yinkeeeduna yihiin W=Wado, B= dhisme, k=Dhisme G= wado

Sidaasi darted maxkmaddu waxay xayirtay labada guri ee kor ku xusan

Waxaa la farayaan xafiiska Nootaayooyinka Fadhiyadooda in aanay kala wareejin Karin Guriga sare ku xusan.

Waxaa kale oo la farayaan Xafiiska Garyaqanka Guud ee Qaranka in uu ku soo Saaro Faafinta Rasmiga,

Sidoo kale dhinaca gacanta ku haya guryahaa waxa la farayaan in aanay iibin Karin sifo kalana ugu tagri falin Karin.

Maxkamadu waxay u Cuskatay Xayiraadan Sida Waafaqsan Qod. 293, 294, 296 X.H.M.

Alaa Mahad Leh.

Yaasiin Xasan Ismaaciil

Ku-xigeenka Gudoomiye Maxkamadda Sare JSL

Ahna K/S Gudoomiyaha Maxkamadda sare jsl.

JAMAHUURIYADA



SOMALILAND

MAXKAMADDA SARE

Supreme Court

تمكح جمهوری ایل عالی

MS/48/014

29/04/015

Ku: - Garyaqanka Guud Ee Dawlada

Ku: - Taliyaha Saldhiga Booliska Ib/Koodbuur

Og: - Taliyaha Qaybta Galbeedka Hargeysa

Ku: - Idaacada Raadiyaw Hargeysa

Ku: - Jaraaidka madaxa Banaan

Ujeedo: Amar Xayiraad Guri 12x12 Mit kuna yaala
Degmadda Ib/Koodbuur, xaa fada Jig Jiga Yar kazoo
horjeedka hoteelka Safaari



Maxkamadda Sare Markuu Arkay: - Codsiga Maxkmadda Sare u soo qoray qareen Rafcaanlaha Jaamac Cilmi Xaashi kuna taariikhaysan 28/04/015 kuna codsadeen in loo xayiro guriga ku yaala Degmadda IB/Koodbuur.

Markay Aragtay: - dacwadaha hortaala maxkamadda ee ka dhaxaysa dhinacyada kala ah:-

Rafcaanle: - C/raxmaan Maxamed C/laahi

Rafcaansane: - Cali Bootaan, dacwadaasi oo oo aan wali go, aan laga gaadhin.

Markay Aragtay: - 293-294 XHM, maxkamaddu waxay soo saartay xayiraadan soo socota

1. Waxaa la xayiray Guriga cabirkiisa iyo jihoo yinkiisuba sare ku xusan yihiin, lama ii bin karo, lama rahmi karo, lama qaybin karo, sifa kalena looma is ticmaali karo ilaa inta amar danbe Maxkmadda sare ka soo baxayo.
2. Xayiraadan waxaa la soo saaray manta 30/04/015.
 1. Maxamed Cumar Geele
 2. Yasiin Xasan Ismaaciil
 3. Axmed Xuseen Dirir